



Xafiiska Kormeeraha Waxbarashadda Dad waynaha
(Office of Superintendent of Public Instruction)

<http://www.k12.wa.us/>

ISUDDUWAHA MAXALIGA AH

Paula Bates, Program Manager
Pullman School District
240 SE Dexter
Pullman, WA 99163
509-332-3144

ISUDDUWAHA GOBOLKA EE WAXBARASHADDA HOY

LAAANTA AH (STATE COORDINATOR FOR
HOMELESS EDUCATION)



**Xarunta Qaranka ee
Waxbarashadda Hoy
la'aanta ah**

<http://nche.ed.gov>

800-308-2145

homeless@serve.org




Waxaad u baahantahay inaad

Ogaato si Aad u caawiso

Ilmahaaga gudaha Dugsiga

Hagaha Waalidka, Masuulada, iyo

Daryeelayaasha



Haddii goyskaagu uu ku jiro xaalad ku meel
gaadha ah ama noolaansho aan ku filnayn oo ay
sababtay waayida guriyaynta, ilmahaagu waxa uu
u qalmi karaa xuquuqo waxbarasho oo gaar ah
iyo adeegyo.



"Ardayda" INCHE

U qalmida Adeegyada McKinney-Vento

Haddii qoyskaagu ku noolyahay:

- gudaha guri gabbod ah
- Gudaha mooteel ama kaambool iyaddoo ay sababtay la'aanshaha hoy kale oo aan ku filnayn
- gudaha baabuur, beer lagu nasto, guri la iskaga guuray, ama istaan ka baska ama tareenka
- dad kale hoy la wadaaga iyaddoo ay sababtay waayida guriyaynta ama dhibaato dhagaale

ilmahaagu waxa uu awood u yeelan karaa inuu caawimo ka helo sharciga federaalka loogu yeedho Xeerka McKinney-Vento.

Carruurtaada u qalanta McKinney-Vento

waxaad leedahay xaga:

- inaad hesho mid ah, waxbarasho dad wayne bilaash ah oo ku habboon.
- inaad dugsi isla markaaba isku diiwaangeliso, xataa haddii aanad hayn warqaddaha caadi ahaan loogu baahanyahay in la diiwaangeliso.
- inaad isku diiwaangeliso dugsi oo aad xaadirta fasalada marka dugsi ugu urursho warqaddaha loo baahanyahay.
- inaad isku diiwaangeliso dugsiaga maxaliga ah; ama sii wado soo xaadirta dugsiaga gobolka (dugsiaga ay dhigteen markii si ku meel gaar ah meel loo dejiyay ama dugsiaga kaas oo ay markii ugu dambaysay iska diiwaangeliyeen), haddii ay taasi dookhaaga tahay. *Haddii dugsiaga degmaddu rumaysanyahay in dugsiaga aad dooratay aanu ahayn danta ugu fiican carruurtaada, marka degmaddu waa inay ku siisa sharax qoran oo mowqifkeeda ah oo ay kugu wargelisa xaga aad rafcaanka kaga qaadanayso.
- ka hela gaadiid raaca lagu tago ee lagaga yimaado dugsiaga asalka ah, haddii aad codsato tan.
- hela adeegyada waxbarashada la barbardhigi karo kuwan la siiyo ardayda kale, si waafaqsan baahiyaha carruurtaada.

Su'aalaha Inta badan la Is waydiyo

Markaan guuro, ilmahaaga ma ku hayn doonaa dugsi isku mid ah ama ma waxaan u beddelaa ilmahaaga dugsi maxali ah?

Ka guurida hal dugsi ilaa mid kale waxay ku noqon kartaa mid ay ku wareeraan carruurta. Waa inay ka tagaan saaxiibo iyo macalimiinta ay garanayaan oo ay la qabsadaan saaxiibo cusub, macalimiin, iyo fasalo. Sababtan awgeed, caadi ahaan aad ayay ugu wanaagsan tahay ilmahaaga inuu joogo dugsiyada/kiisa isku midka ah (dugsiaga asalka ah), xataa hadduu aad u guurto aag kale.

Halkan waxaa ah qayb su'aalo ah oo laga fekerayo wax ku saabsan marka go'aan lagu gaadhayo haddii ilmahaagu uu joogi lahaa dugsi isku mid ah ama u guuri lahaa dugsi cusub halka aad ku nooshahay:

- Waa imisa jir ilmahaagu?
- Sidee ayay joogto u tahay qaban qaabadaada nolosha haddu?
- Miyaad qorshaynaysaa inaad dib ugu guurto meel u dhow dugsiaga asalka ah ama ma u malaynaysaa inaad joogi lahayd meel u dhow qaban qaabadaada nolosha hadda?
- Ilmahaagu ma ku xidhan yahay dugsiyada ama kiisa hadalka ah? Ilma wayn oo dareemaya inuu aad ugu xidhanyahay dugsiyada/keeda asalka ah iyo/ama inuu qalan jebiyayo la kulmi lahaa wakhti ka adaga beddelida dugsiaga.
- Sideed uga walaacsan tahay ilmahaaga sababtoo ah waa inaad guurtaa? Miyay beddelida dugsiyadu noqon kartaa mid waxyeelo leh?
- Miyay beddelida dugsiyada ku sababtaa ilmahaaga inuu dib u dhac dugsiyada ku yimaado oo helo buundooyin xun?
- Tani ma tahay wakhti wanaagsan ee sanadka ilmahaaga inuu beddelo dugsiyada, sida dhammaadka simistarka ama sanad dugsiyadeeda, ka dib imtixaanka marka la qaado, ama ka dib dhacdaada muhiimka u ah ilmahaaga?
- Wakhti intee leeg ayuu ilmahaagu ku qaadanayaa dib iyo hore ugu tegida dugsiyada asalka ah? Fuuqtaan dheer waxa uu ku yeelan karaa saamayn xun shaqada dugsiyada ee ilmahaaga.
- Ma jiraan arrimo badbaado oo laga fekerayo doorashada ka uu yahay dugsiyada ilmahaagu uu xaadiri lahaa?

Bal ka waran haddii aniga iyo dugsigu aan isku khilaafno wax ku saabsan halka ilmahayga uu ka tegayo dugsiga?

Haddii adiga iyo dugsigu aad is khilaaftaan, degmadda dugsigu waa inay kuu sheegtaa adiga qoraal ahaan sababta ay ugu malaynayso ilmahaagu inuu tegayo dugsiga ka duwan midka aad doonayso. Degmaddu waa inay sidoo kale kuugu sheegtaa qoraal ahaan sida aad rafcaanka uga qaadan karto go'aankan. Ilmahaagu weli waxa uu iska diwaan gelin karaa, soo xaadiri karaa, oo ka qayb geli karaa si buuxda gudaha dugsiga aad u malaynayso inuu isaga u wanaagsan yahay ama iyadda marka la dejinayo khilaafka.

Kumaan la xidhiidhi karaa si uu iiga caawiyo waxbarashadda ilmahayga?

- Dugsi kasta oo degmadda ah waxa uu leeyahay **isku xidhaha waxbarashadda hoy la'aanta**. Qofkan waxa uu kaa caawin karaa inaad go'aan ka gaadho ka uu yahay dugsiga ku habboonaan lahaa ilmahaaga oo aad la xidhiidho dugsiga. Isku duwaha maxaliga ah sidoo waxa uu ka caawin karaa ilmahaaga inuu helo agabka dugsiga, adeegyada kaabbiida ah, iyo cuntooyinka dugsiga bilaashka ah, habbeeyo gaadiidka tegaya ee ka imanaya dugsiga asalka ah, oo caawiyo adigu inaad hesho taageerooyinka bulshadda.
- Markaad ilmahaaga u diiwaangeliso dugsi cusub, waa inaad waydiiso inaad la kullanto **macalinkisa/keeda(ooda)**. Waa inaad had iyo jeer la hadashadaa macalinka(miinta) ilmahaaga si aad u badan si aad ugalaha hadasho waxa isaga ama iyaddu samaynayo. U garo si wanaagsan ugu yaraan macalin ka mid ah dugsiga ilmahaaga si aad u waydiiso su'aalo ku saabsan shaqada dugsiga ee ilmahaaga iyo inaad siiso isaga ama iyadda macluumaad ka caawin doona ilmahaagu inuu waxbarto.
- **La taliyaha dugsiga** waxa uu ilmahaaga ka caawin karaa isbeddela iyo caqabaddaha. La wadaag qofkan macluumaad kasta oo ku saabsan sida ilmahaagu uu guriga ku yahay, ama waxyaabaha isaga ama iyaddu uu samaynayo ee saamaynaysa shaqada dugsiga
- Dadka kale ee wanaagsan ee ay tahay in la garto waa **maamulaha dugsiga, sarkaalka soo xaadirka, darawalka baska, shaqaalaha bulshadda dugsiga**, iyo **kalkaalisada dugsiga**.
- **Dhammaan dugsiga iyo shaqaalaha dugsiga degmadda** waxay caawin karaan in la hubiyo in ilmahaagu helo dhammaan adeegyada isaga ama iyaddu u baahan tahay inay si wanaagsan ka samaynayaan dugsiga.

Su'aalaha ayaan waydinayaa waxa ku saabsan adeegyada hoosta Xeerka McKinney-Vento?

- Waa kuma isku duwaha waxbarashadda hoy la'aanta maxaliga ah? Sideen ula xidhiidhi karaa isaga ama iyadda?
- Gaadiidkee loo heli karaa ilmahayga si uu u jooogo dugsiga isku mid ah (dugsiga asalka ah)?
- Haddii ilmahaygu dugsiga beddelo, kumaa naga caawin kara u beddelida diiwaanka dugsiga cusub si degdeg ag?
- Sidee ilmahaygu kaga heli karaa cuntooyin bilaash ah dugsiyada?
- Sidee ilmahaygu ku heli karaa saadka bilaashka ah ee dugsiga haddii uu u baahdo?
- Kumaa caawin kara haddii ilmahaygu u baahdo adeegyada waxbarashadda gaarka ah? Degdeg intee leeg ayaa adeegyadan lagu habbayn karaa?
- Caawimadee tacliimeed ayaa loo heli karaa ilmahayaga sida Cinwaanka I barnaamijyada ama waxbarida dugsiga ka dib?
- Barnaamijyadee caawin kara horumarinta kartiyaha ilmahayga oo ka hadli kara baahiyahiisa/keeda gaarka ah?
- Miyya jiraan ciyaaro, muusig, ama hawlo kale oo loo heli karo ilmahayga?
- Sidee ilmahaygu u sii wadan karaan safarada dibada fasalka ama uga qayb geli karaa hawlo dugsiga kale haddii aanan anigu lacagta ka bixin karin?
- Ma jiraa barnaamij ka horeeya dugsiga oo loogu talo galay carruurtaayda da'da yar?

Maxaan samayn karaa si aan u caawiyo ilmahaaga gudaha dugsigta?

- Hubi ilmahaagu inuu tago dugsigta maalin kasta oo uu yimaado isagoo nastay oo la quudiyay.
- Sii meel degen oo ilmahaagu kaga shaqeeyo layliska guriga, oo u habbee wakhti maalin kasta aad kaga caawiso ilmahaaga layliska guriga.
- Dareenka u soo jeedi baahiyaha caafimaadka ilmahaaga oo daryeel dhibaatooyin kasta goor hore.
- Waydii ilmahaaga waxa isaga ama iyaddu uu ku baranayo dugsigal. Isaga ama iyaddu ha kuu sharaxo. Haddii aad xiise ka muujiso waxbarashadda ilmahaaga, isaga ama iyaddu waxa uu ogaan doonaa inay muhiim tahay.
- Wax u akhri ilmahaaga maalin kasta. Carruurta da'da wayn, u habbee wakhti maalin kasta adiga iyo ilmahaagu aad si aamushi ah wax u wada akhridaan. Ka hada waxaad akhriday.
- Ku ammaan ilmahaaga waxay si wanaagsa ama isaga ama iyaddu u sameeyo, sida helida buundo wanaagsan ama u ciyaarida kooxda ciyaaraha dugsigta.
- Dhegaysa waxa uu ilmahaagu la wadaago adiga oo ka hadal dhibaatooyin kasta isaga ama iyaddu qabo. Waxaad sidoo kale ka hadli kartaa dhibaatooyinkan macalinka ama la taliyaha dugsigta.
- Ku dhiirigeli ilmahaagu inuu ka qayb galo waxyaabaha sida ciyaaraha iyo muusiga.

Su'aalaha Wanaagsan Waxay Sameeyaan Akhriyaal Wanaagsan

Waydiinta Carruurta wax ku saabsan waxay akhriyeen waxay ka caawin doontaa inay noqdaan fekerayaal wanaagsan

Wixii ah sheekooyinka (khiyaaliga ah):

- ◆ Maxaa dhacay? Maxaad u malaynaysaa inuu marka xiga dhici doono? Sabatee?
- ◆ Waa kuma jilaaga ugu muhiimsan? Miyaad jeceshahay isaga/iyadda? Sabatee? Ma samayn lahayd waxa uu isaga ama iyaddu sameeyay? Haddii aanay sidaas ahayn, maxaad samayn lahayd?
- ◆ Sidee ayay sheekadan kaa dhigtaa inaad dareento?

Qoraalka macluumaadka ah (aan khiyaaliga ahayn):

- ◆ Muxuu maqaalka ama cutubku ku saabsan yahay? Dalbo faahfaahin dheeraad ah sida suurtagalka ah.
- ◆ Maxaad u malaynaysaa inuu ahaa godobka muhiimka ah ee qoraagu?
- ◆ Qaybtee ayaad ka heshay inay ahayd ta aadka u xiisa badan?
- ◆ Sababtee ayaad ugu malaynaysaa macluumaadkan inuu muhiim yahay?

KHAYRAADKA KA YIMID NCHE

Laynka caawimada wictaanka bilaashka ah: 800-308-2145

ama homeless@serve.org

NCHE waxay u sharaxi kartaa ilmahaaga xuquuqdiisa dugsigta oo waxay kuu sheegi kartaa sida loola xidhiidho isuduwaha maxaliga ah ee dugsigta degmaddaada. Isuduwaha maxaliga waxa uu caawin karaa ilmahaagu inuu isku diiwaangeliyoo dugsigta oo waxa uu hubiyaa in ilmahaagu helo caawimada isaga/iyaddu u baahantahay.

Websaydka: <http://nche.ed.gov>

Websaydka NCHE waxa uu hayaa macluumaad badan oo wanaagsan, ay ku jirto bogga internatka waalidka doonaya inay caawiyaan carruurtooda: https://nche.ed.gov/ibt/parent_res.php.

Faylasha Xidhmada Jeebka waalidka

Faylashada Xidhmada Jeebka waalidka waa faylasha halka aad ku hayn karto diiwaanada muhiimka ah iyo warqaddaha la xidhiidha dugsi dhigashada ilmahaaga. Faylku sidoo kale waxa uu sharaxaa xuquuqaha waxbarashadda ee carruurta ku jira xaaladaha hoy la'aan ah.

Ku dalbo faylasha bilaash addoo soo

wacaya 800-308-2145 ama booqanaya

https://nche.ed.gov/online_order.php.

MACLUUWAAD MUHIIM AH
Gushta ilmahaaga
ee Dugsiga...

